

# Xog Talo Bixin ah oo Ku socota Shaqaalaha Ikhtiyaarkooda ku Adeegsada Qalabka Neefsiga



## **Xeerka Agabka Neefsiga, Shaxda 2, WAC 296-842-11005**

Agabka neefsiga ayaa kaa difaacaaya khataraga hawada marka aad si sax ah u doorato una xirato. Agabka neefsiga ee ay qasab ka dhigayso L&I (Waaxda Shaqada iyo Shaqaallaha) Laanteeda Badqabka iyo Caafimaadka Shaqada (Division of Occupational Safety and Health, DOSH) ama qofka aad u shaqayso maaha ikhtiyaari. Marka isticmaalka laga dhigo qasab, shirkada aad u shaqayso ayaa u baahan inuu tababar dheeraad ah bxsho uuna buuxsho shuruudaha dheeraadka ah ee xeerka Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 296-842 ee **Agabka neefsiga**. DOSH waxay ku talinaysaa isticmaalka ikhtiyaariga marka

waxyaabaha lagu shaqaynaayo ay ka hooseeyaan heerarka xadidaada banbaxa (Permissible Exposure Limit, PEL) ee DOSH waayo waxay bixin ku siin doonaan difaac heer dheeraad ah.

Isticmaalka ikhtiyaariga ah ee agabka neefsiga ayaa abuuri kara khatar ku dhacda qofka xiran. Haddii aad doorato ilaad si iskaa ah u adeegsato qalabka neefsiga (ee adiggu leedahay ama qofka aad u shaqayso ku siiyay), waad iska ilaalin kartaa khatarahaan adoo baranaaya sida loo adeegsado loona nadiifiyo qalabkaaga neefsiga.

### **Qaad talaabooyinkaan:**

- Akhri oo raac dhammaan tilmaamaha ay shirkada qalabka samaysay ee ku aadan isticmaalka, iyo ilaalinta (nadiifinta iyo daryeelida), iyo digniinta ku aadan xadidaadaha qalabka neefsiga.
- Dooro qalabka neefsiga ee uu ogolaaday Machadka Qaran ee Badqabka iyo Caafimaadka Shaqada (National Institute for Occupational Safety and Health, NIOSH) kaasoo kaa difaacaaya khataraha imaan karta. Haddii agabka neefsiga uusan aqoonsi siin NIOSH, waxaa laga yaabaa inuusan buuxin heerarka ugu yar ee naqshada iyo shaqada ee isticmaalka goobta shaqada.
  - Cabirka ogolaanshaha NIOSH ayaa kasoo muuqan doona dusha ama gudaha baakada qalabka neefsiga. Wuxuu kuu sheegayaa nooca difaaca agabka neefsiga ku siinaayo.
  - Isha ku haay qalabkaaga neefsiga si aadan u xiran kan qof kale.
  - **Ha** ku xiran qalabkaaga neefsiga ee ikhtiyaariga ah aagaga ama xaaladaha u baahan qalabka neefsiga sida:
    - Hawada leh khataraha qalabkaaga neefsiga aan loo samayn inuu ka hortago. Tusaale: qalabka neefsiga ee loo sameeyay inuu sifeeyo boorka kaama difaaci doono isku darka uumiga, sigaarka, ama oksijiin yarida.
    - Meelaha ama shaqooyinka loogu baahan yahay isticmaalka qalabka neefsiga, marka keliya lagu ogolaado inaad ku isticmaasho ikhtiyaarkaaga.

---

Shirkadaha loo shaqeeyo ayaa siin kara xogtaan shaqaalaha adeegsanaaya qalabka neefsiga ee ikhtiyaariga ah si loo qanciyo shardiga bixinta Shaxda 2 ee xeerka WAC 296-842-11005 ee qalabka Neefsiga.

Si aad xog dheeraad ah uga hesho qalabka neefsiga ah arag xeerka qalabka Neefsiga WAC 296-842, <https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=296-842>